Maxaa Beddeli Doona?

Laga bilaabo Barnaamijyada Ka dhaafida Medicaid ilaa Daryeelka mudada dheer ee la Maareeyo

Waxaad hadda helaysaa adeegyada ay maalgeliso barnaamijka Medicaid Waiver (Ka dhaafida Medicaid) sida Barnaamijka Dookhyada Bulshadda (COP, Community Options Program), Barnaamijka Is dhexgalka Bulshadda (CIP, Community Integration Program), ama Ka dhaafida Dhaawaca Maskaxda (BIW, Brain Injury Waiver). Barnaamijyada way isbeddelayaan marka daryeelka mudada dheer la maareeyo ay noqoto mid laga heli karo aagaaga. Dukumentigan waxay bixinayaan jawaabo muhiim ah oo ah su'aalaha ku saabsan turjumaadan iyo saamaynta ay adiga kugu leedahay.

Waa maxay daryeelka mudada dheer la maareeyo?

Daryeelka mudada dheer la maareeyo waa eray bixinta loo isticmaalo in lagu sharaxo barnaamijyada hadda loo heli karo in lagu bixiyo heer buuxa oo adeegyada daryeelka mudada dheer ah oo aad u baahan karto. Barnaamijyadan way ka duwan yihiin barnaamijka aad hadda ku jirto sababtoo ah way isku duba ridaan dheef hal ah oo debecsan dhammaan adeegyada aad u baahan karto si aad u sii wado ama u horumariso caafimaadkaaga iyo fayo qabkayga. Caawintana waxaad u noolaagtaa qaabka aad doonayso, marka ay ahaato mid waxtar leh, waxaanu awoodi doonaa inaanu helno adeegyada dadka badan ay u baahanyihiin oo waxay tirtiraan liisaska sugitaanka adeegyadan.

Waxaa jirta noocyo kala dywan oo barnaamijyada daryeelka mudada dheer la maareeyo gudah Wisconsin: Family Care, Family Care Partnership (sida kale loo yaqaano Partnership) iyo Program of All-Inclusive Care for the Elderly (Barnaamijka Dhammaan Daryeelka Ku dararida ee Duqayda) (sidoo kale loo yaqaano PACE).

Barnaamijka Family Care (Daryeelka Qoyska) waxay isku duba ridaa dhammaan adeegyada daryeelka mudada dheer iyo taageerooyinka hoore loo heli karo dhexda barnaamijyada gaarka ah. Caafimaadkaaga, daryeelka caafimaadka iyo dawo qoridu way ku sii socotaa inay daboosho Medicare iyo Medicaid. Partnership (Iskaashiga) iyo PACE waxay daboolaan dhammaan adeegyada daryeelka mudada dheer ee xidhmada aasaasiga ah ee Family Care lagud a ray dhammaan adeegyadaada caafimaadka iyo dawada iyo dawo qoridaada, dhammaan hal xidhmo. Barnaamijka(yada) aad adigu heli karto waxay ku xidhnaan doonaan halka aad ku nooshahay.

Ma haysan doonaa adeegyo isku mid ah?

Xidhmada dheefta mudada dheer la maareeyo waxaa ka mid ah dhammaan adeegyada barnaamijyada Medicaid Waiver (CIP, COP, iyo BIW) iyo qaar ka mid ah adeegyada ay maalgeliso kaadhka Medicaid ForwardHealth. Ururada daryeelka la maareeyo, ama MCO, waxay sidoo kale bixin karaa adeegyo dheeraad ah oo aan ku jirin xidhmada dheefta Medicaid haddii ay buuxiyaan natiijooyinka shakhsiga xubinta ka ah oo kharashkooduna aanu badnayn.

Waxaad ku heli doontaa adeegyada aad u baahantay heerka aad ugu baahato, taageero kharash badan aan lahayn natiijooyinka aad doonayso inaad ka guul gaadho adeegyadaas. Tan way dhici kartaa ama ma dhici karto inay noqoto adeegyada dhabta ah ee la midka heerka la midka ah ee aad hadda ka hesho iyaga. Adeegyadu si AAN toos ahayn uma go'do, oo ma jiraan go'aanada "dhammaan la xidhiidha" ee ku saabsan cida hesha adeegyada. Haddii isbeddelo lagu sameeyay qorshahaaga daryeelka, isbeddeladan waxay keeni

doonaan mid aad loo gaaryeelay, adeegyo waxtar badan kuu leh adiga. Tani waa sababtoo ah nooca qorshaynta daryeelka ka dhaca Daryeelka La maareeyo waxay xooga saartaa buuxinta natiijoyinkaaga shakhsiyeed e ela gaar yeelay. Adeegyada aad waxtar u lahayn taageerida natiijooyinkaaga si suuragal ah waa la joojin doonaa.

Waa muhiim inaad xusuusato in haddii baahiyahaaga ama natiijooyinka ay muddo ka dib isbeddelaan, qorshahaaga daryeelku sidoo kale wuu isbeddelaa. Waa inaadan isku deyin inaad ku darto adeegyada qorshahaaga daryeelka aanad u baahanayn maanta, xataa haddii aad uga baahato iyaga mustaqbalka.



Ma haysan karaa maareeye daryeel oo isku mid ah?

Waa suuragal inaad haysato maareeye daryeel oo ka duwan. Ururka(ada) daryeelka la maareeyo waxay shaqaalayn doonaan kuwa takahsus leh, maareeyayaal xirfad yaqaano daryeel ah kuwaas oosi dhow kuula shaqayn doona adiga si ay u xaqiijiyaan inaad haysato taageerada aad u baahantahay si aad ugu noolaato nolosha aad jeceshahay.

Intaa wax adheer, waxaad haysan doontaa ugu yaraan hal xubin cusub ah oo kooxdaada daryeelka ah oo aanad haysan xiligii hore: kalkaaliso. Family Care Partnership waxaad sidoo kale haysan doontaa hawl wadeenka kalkaaliska, iyo dhakhtarka kooxdaada. Shakhsiyaadkan waxay kaala shaqayn doonaan adiga iyo maareeyahaaga kiiska si loo xaqiijiyo inaad la kullanto caafimaadka ugu suuragalsan oo aad hesho adeega ugu suuragalsan.

Ma heli doonaa adeeg bixiyayaal isku mid ah?

Tani waxay ku xidhantahay haddii adeeg bixiyayaashaada hadda ay ku jiraan MCO "shabkada adeeg bixiyaha" iyo haddii kooxdaada daryeelku ay go'aamiso in adeeg bixiyahaaga hadda uu buuxiyo natiijooyinka shakhsiga qaab kharash badan aan ahayn.

Badanka qorshaah MCO ee qanadaraaska siinaysa dhammaan adeeg bixiyayaasha ee barnaamijyada ka dhaafida degmaddu isticmaalay. Family Care tirada adeeg bixiyayaasha waxaa loo heli karaa xubanaha dhab ahaan kobcay sababtoo ah barnaamijka waxaa looga baahan yahay inuu u lahaado adeeg bixiyayaal dhamma adeegyada uu daboolo barnaamijku oo haysto wax ku filan si loo siiyo doorashada adeeg bixiyayaasha xubnaheeda. Waxaad awoodi kartaa inaad doorato adeeg bixiye cusub kaas oo aan laguu heli karin adiga xiligii hore.

Adeegy bixiyaasha yimid gurigaaga ama ku siiya daryeelka diyaarka ah adiga, sida daryeelka gaarka ah, MCO waa inay ka iibsataa adeegyada cid kasta oo aad doorato ilaa inta qofku uu buuxiyo shuruudaha MCO oo aqbalo qiimaha lacag bixinta MCO.

Adeegyada kalena, waxaad ka dooran kartaa dhexda adeeg bixiyayaasha ku jira shabakada adeeg bixiyaha MCO. Si kastab ha ahaatee, MCO waxay awoodaa inay lahaato qaban qaabo aad u kharash yar oo wadata hal adeeg bixiye halkii ay mid kale ka ahaan lahayd. Xaaladan, MCO waxay bixin kartaa badanka qaab kharash yar si ay u bixiso taageerooyinka lama huraanka ah. Tusaale, MCO waxay leedahay qaban qaabada hal adeeg bixiyaha daryeelka guriga ee maalinle ah ama qiimaha habeenka ee adeegyada, laakiin qandaraas qaata adeegyada saacadlaha ah oo leh adeeg bixiye daryeelka guriga ah oo kale. Qiimaha maalinlaha ah ugu badnaan waa mid dhaqaale leh, iyo MCO waxay xadidi kartaa doorashada badanka qaabka ugu kharashka yar si loo bixiyo taageerada loo baahanyahay.

Haddii aad hadda tahay loo shaqeeyo oo aad dhaqaalaysay adeeg bixiyayaashaada ilaa Taageerooyinka Iskaa U hagida, waxaad awood u yeelan doontaa inaad sidaas sii samayso daryeelka mudada dheer la maareeyo.